Warqadaha barashada xogta cadaalada
By Mid-Minnesota Legal Aid and Legal Services State Support

e4j@mylegalaid.org

Somali

Labada Aan Is Guursan, Daynta iyo Hantida

Unmarried Couples, Debt and Property

Marka dadku is guursadaan, waxaa jira sharciyo dabakhaya xidhiidhkooda. Sidoo kale sharciyadan waxay ilaaliyaan waxyaabaha haddii guurku ku dhamaado furniin. Tusaale ahaan, marka dadka is qaba is furaan, sharciga Minnesota wuxuu dhahaa alaabada ay leeyihiin waa loo kala qaybin doonaa. Dhibna kama jiro qofka wax bixiyay. Marka lamaane wada noolyihiin meher la'aan sharcigaanu ma dabakhayo.



Haddii adiga iyo wehelkaagu iidna rabin inaad is guursataan, ama iidna is guursan karin waa arrin u wanaagsan labadiina inaad go'aansataan waxa ku dhacaya waxyaabaha idinka dhexeeya haddii xadhiidhkiinu dhamaado ama midkiin wax ku dhaco. Haddii waxyaabaha lagu dhameeyo maxkamad, aad ayay u fudutahay haddii aad heshiis samaysaan bilawga.

Ma masuul ayaan ka ahay daynta wehelkayga?

Masuul kama tihid daymaha wehelkaaga sababtoo ah waad wada nooshihiin uun. Waxaad kali ah ood masuul katahay daymaha aad ogolaatay inaad bixinayso. Tani micnaheedu waa daynta ku qoran magacaaga ama aad saxiixday heshiis sheegaya inaad bixin doontid.

Haddii adiga iyo wehelkaaga aad qabtaan dayn aad ku qorantihiin labadiinaba, hadaba labadiinaba masuul ayaad ka tihiin bixinta.

Tusaale ahaan: Haddii aad haysataan kaarka bangiga oo labadiina magac ku qoran labadiinaba waa inaad bixisaan biilasha. Dhibaato ma lahan qofka iibiyay alaabada ama haddii midkiin uuna doonaynin inuu iibsado.

Waxaan galnay heshiis afka ah waxyaabaha, taasi ma ku filantahay?

Dhibaatada ka jirta heshiiska afka ah waa waxaa adkaan karta in la cadeeyo. Waxaa ku adkaan karta in laga dhaadhiciyo garsooraha in uu jiray heshiis oo aad tix raacday qaybta heshiiskaaga.

Tusaale ahaan: Haddii aad samayso mashruucyo hagaajin wax ka badalidda magaca guriga, waa inaad tustid garsooraha cadayn in aad samaysay mashruucyo hagaajin, inta aad lacag iyo wakhti ku kharashgaraysay, iyo qiimaha ay ku dareen guriga. Waa inaad ka dhaadhicisaa garsooraha inaad qabatay waxyaabahan sababtoo ah waxaad aaminsanayd inuu jiro heshiis. Sababtoo ah ma

jiro dukumiinti qoran oo garsooruhu fiirin karo, waxay ku dhici qofka garsooruhu aaminsanyahay. Waxaad waayi doontaa kiiskaaga haddii garsooruhu aaminsanyahay wehelkaaga oo adiga uuna aaminsanayn.

Inaad heshiis qoran haysato mooyaane, ma ahan arrin wanaagsan in wehelkaagu ogolaado inaad wadaagtaan dhaqaalihiisa ama dhaqaalaheeda ama aad ku qorto magacaaga magaca guriga ee wax ka badalidda wax. Sidoo kale arrin wanaagsan ma ahan in la dhaho heshiiskaaga waxaa lagu saleeyay “inuu qoys ahaado.”

Haddii adiga iyo wehelkaagu aad jabisaan ood ku dhamaysaan maxakamad, heshiis qoraal ah ayaa arrimaha ka dhigi kara kuwo fudud.

Haddii iidna haysan heshiis qoraal ah, alaabta aad iibsateen markii aad isla joogteen guud ahaan waa la kala qaybin doonaa ayadoo lagu salaynayo kee bixiyay. Lacag kasta oo labadiinaba aad haysateen waa la kala qaybin doonaa ayadoo lagu salaynayo yaa shaqeeyay. Wax iibsashada isku xidhan waa la kala qaybin doonaa, ama midkiin wuxuu bixin karaa ka kale waxa uu celiyo ee cadadka asaga ama ayadu galisay.

Tusaale ahaan: Haddii aad iibsatid guri labadiina magac ah, maxkamaddu waxay “kala qaybin” kartaa ama xidhiidh jaridda xuquuqdaada. Maxkmaddu waxay fara kartaa in midkiinba u xaq u leeyahay badh guriga ah (50-50). Ama maxkamaddu waxay go’aansan kartaa in midkiin uu helo wax ka yar midka kale. Maxkamaddu waxay amri kartaa in guriga la iibiyo oo lacagta la kala qaybiyo ayadoo la fiirinayo qaybta qof kasta leeyahay.

Haddii wehelkaagu leeyahay guri oo iidan haysan heshiis qoraal ah, aad bay u adagtahay in laga dhaadhiciyo maxkamadda in aad xooga xaq ah ku leedahay guriga. Waxaad u sheegi kartaa maxkamadda lacagta ama wakhtiga aad galisay hagaajinta guriga, lacagta ku baxday kharashaadka qoyska, ama wakhtiga aad siisay xanaanada caruurta, laakiin maxkamaddu waxay wali go’aamin kartaa inaadan wax xuquuq ah ku lahayn guriga oodan waxba ka heli karin.

Heshiisyada qoraalka

Haysashada waxyaabaha qoraal ahaan waa arrin wanaagsan. Adiga iyo wehelkaaga waa inaad ka fikirtaan samaynta “heshiiska wada noolaanshaha.” Heshiiska wada noolaanshaha waa heshiis qoraal ah oo u dhexeeya 2 badiina kaasoo qeexaya hantida iyo lacagta xidhiidhkiina wuxuuna kala qaybiyaa waxa aad rabtid inay dhacaan haddii xidhiidhku dhamaado.

Haddii xidhiidhkiinu dhamaado sababtoo ah adiga iyo wehelkaaga kala go’o waxaad ogaan doontaa si sax qofka la hadhi doona hantida iyo qofka bixin doona daynta.

Heshiisyada wada noolaansho kuma badalmaan go’aan, laakiin maxkamaduhu waxay meel marin doonaan haddii xidhiidhku dhamaado sababtuna ay tahay wehelada midkood haddii uu dhinto.

Minnesota dhexdeeda, heshiisyada wada noolaanshaha **waa inay qoraal ahaadaan.** Haddii adiga ama wehelkaagu haysataan heshiis afka ah oo kali ah, waa inaad qortaan dhamaan waxyaabaha muhiimka ah adiga iyo wehelkaaga aad ku heshiiseen ka dibna labadiinaba waa inaad saxiixdaan heshiiska.

Seen ku ogaan Haddii aan u baahnahay Heshiis Wada Noolaansho?

Heshiisyada Wada Noolaansho waxay sheegaan waxa ku dhacaya hantida, lacagta, iyo daymaha. Waa arrin wanaagsan markasta ood la nooshahay wehelkaaga muddo dheer ama aad wadaagaysaan hanti iyo dhaqaale. In badan ood isla joogtaan aad ayay ugu muhiimsantahay in la samaysto heshiis wada noolaansho.

Waxaa muhiimad wayn u noqon karta marka ay jiraan kala duwanaansho wayn oo dhaqaale oo u dhaxaysa adiga iyo wehelkaaga. Sida marka qofka kale uu joogo guriga oo uu hayo caruurta.

Waxaa jira qaabab kale lagu muujinayo xuquuqdaada hantida iyo lacagta, laakiin aad ayay u adkaan kartaa waxayna ku lug yeelan kartaa maxkamadeyn ka badan heshiiska wada noolaansha fudud.

Maxaa lagu sameeyaa heshiiska sharci?

1) Qoraal
2) Saxiixyo
3) “Wax bixinta”

Heshiiskiinu waa in la qoraa oo la saxiixaa. Sidoo kale heshiiskiina waa inuu ku jiraa “wax bixinta.” Wax bixintu waa in wax la siiyo wax kale. Tusaale ahaan, waxaad wadaagtaan dhaqaalaha wehelkaaga **is dhaafsiga** joogidda guriga si loo hayo caruurta. Wax bixinta ma ahan inay isku mid ahaato. Aday ku jirtaa waxa aad rabtid inay noqoto, waa in aad uun ka bixisaa faafaahin ku saabsan heshiiska dhexdiisa.

Maxay tahay waxa aan ku jiraynin Heshiiskayaga Wada Noolaansho?

Guud ahaan ma ahan arrin wanaagsan inaad ku sheegtid qaabkiina galmo heshiiska wada noolaanshaha. Maxkamaddu ma siin karto tix galin heshiis lagu qoray qaabka galmo ee heshiiska, sidaa darteed waxaa wanaagsan inaad iska dhaafto.

Maxkamaddu waxay kali ah ooy meel marin doontaa heshiisyada wada noolaansho marka xidhiidhku dhamaado. Ka tag ku daridda waxyaabaha ku saabsan qofka qaban doona shaqada ama bixin biilasha idinkoo isla nool. Waxaad samaysan kartaan, heshiis gooni ah oo ku saabsan qofka qaban doona waxyaabaha qoys, laakiin maxkamaddu ma meel marin doonto heshiisyadaan.

Maxay tahay waxyaabaha ay tahay inay ku jiraan Heshiiska Wada Noolaansho?

Marka adiga iyo wehelkaagu qortaan heshiis, ka fikir waxyaabaha muhiimka ah ee qoyskiina. Heshiiskiina waa la faafaahin doonaa waxaana ku jiri qayb kasta oo dhaqaale oo xidhiidhkiina ah, ama waxaa uun ka mid noqon waxyaabo dhawr ah, sida waxyaabaha waawayn eed iibisay. Halkaan waxaa ah waxyaabo muhiim ah in lagu qoro heshiiska:

Hantida iyo Maalka Kale

Waa arrin wanaagsan in la taxo dhamaan hantida iyo maalka adiga ama wehelkaagu leeyahay. Maalku waa waxyaabaha sida lacag, akoontiyada hawlgabka, xoolo, iyo wax kasta ood kaga ganacsato lacag oo kale. Adiga iyo wehelkaagu waa inaad go'aansataan haddii iyo sida aad u wadaagi doontaan hantida iyo maalka iyo qofka qaadan doona haddii xidhiidhkiinu dhamaado.

Waxaa jira 3 nooc waawayn oo ah hantida ay tahay inaad ka fikirtid.

1. Hantida adiga ama wehelkaagu lahaa ka hor xidhiidhkiina.

2. Hadiyadaha ama hantida aad dhaxashay ka dib marka uu xidhiidhkiinu bilawday.

3. Hantida la gaday muddadii xidhiidhkiina. Waxaa jira noocyo dhawr ah hantidan.

    - Waxyaabaha midkiin uu u iibiyo lafttirkaaga.

    - Waxyaabaha aad wada iibsataan si siman aad u leedihiin (50-50).

    - Waxyaabaha aad wada iibsataan, laakiin aad filaysid qofka leh waxaa lagu samayn inta qof kasta uu ku bixiyay. Tusaale ahaan, haddii aad wax ku iibsateen $100 ood bixisay $75 wehelkaaguna bixiyay $25, hadaba waxaad leedahay 75% wehelkaaguna wuxuu leeyahay 25%.

    - Waxyaabaha uu iibiyay midkiin oo kali ah, laakiin kan kale uu wax ka bixiyay mar danbe. Tusaale ahaan, haddii wehelkaagu iibsado guri, laakiin waxaad ogolaatay inaad galiso wakhti ama xoog si aad u hagaajiso. Waa inaad go'aansataa in wehelkaagu sii lahaado guri ama in aad dhisi doonto "wax ku yeelato" guriga xooggaaga. "Wax ku yeelato" micnaheedu waa waxaad kasban faa'iido lahaansho ee xoogsi meeshii aad lacag ku heli lahayd.

Akoonada Bangi

Go'aanso haddii adiga ama wehelkaaga uu doonayo inuu haysto akoono bangi oo gooni ah, ama uu galiyo dhamaan lacagta hal akoonti. Maskaxda ku hay in haddii aad wadaagtaan akoon bangi, in midkiin uu la bixi karo dhamaan lacagta dardaaran la'aanta midka kale.

Haddii aad go'aansataan inaad wadaagtaan akoonti bangi, go'aansada sida lacagta akoontiga ku jirta la idiinku kala qaybin haddii xidhiidhkiinu dhamaado.

Ka fikir

- Waa maxay qaybta lacagta uu qaadan doono midkiin?

- Midkiin ma galiyay cadad badan bilawgii taaso ay tahay in la bixiyo ka hor inta hadhaaga la qaybin?

Daynta

Sidoo kale adiga iyo wehelkaagu waa inaad kawada hadashaan sida daynta loo kala qadanayo. Waxaa jira noocyo dhawr ah oo ay tahay inaad tix galiso

1. Daymaha adiga iyo wehelkaagu aad qabteen ka hor inta uuna bilaabmin xidhiidhkiinu. Kuwaan waxay noqon daymaha iskuulka, biilasha kaarka bangi, caawinta lacag bixinta ilmo, iwm.

2. Daymaha adiga ama wehelkaagu uu shakhsi ahaan helay muddadii xidhiidhkiina.

3. Daymaha aad wadajir hesheen muddadii xidhiidhkiina.

U adeegso heshiiskiina in la sheego qofka masuulka ka ah bixinta daymaha haddii xidhiidhkiinu dhamaado.

Kaararka Bangi



Waxaad u adeegsan kartaan heshiiskiina inaad go'aansataan haddii aad wadaagi doontaan kaararka bangiga ama aad ku qoraysaan magacaaga oo kali ah, ama isku dar. Xasuusnaw, haddii adiga iyo wehelkaaga labadiinaba lagu qoro kaarka, labadiinaba masuul ayaad ka tihiin dhamaan kharashaadka lagu soo dalaco kaarka. Tani micnaheedu waa haddii wehelkaagu ku galo kharash badan kaarka, shirkadda kaarka bangiga waxay kuu qaban inaad masuul ka tahay xataa haddii aadan waxba ka ogayn ama ay caadi kuu tahay iibsashada. Go'aanso waxa ku dhici doona kaararkan haddii xidhiidhkiinu dhamaado iyo cidda masuul ka noqon doonta bixinta biilasha kaarka bangiga.

Arrimaha Kale

Waxaad galisay waxyaabo kale heshiiskiina wada noolaanshaha, sida haynta iyo wakhti siinta waalidnimo ee caruurta iyo waxyaabo muhiim ah oo ah go'aamada noolasha. **Laakiin**, waxaa jiri kara dhibaato meel marin qaybahan, sidaa darteed haddii aad rabtid inaad galiso, kala hadal qareen.

Maan badali karnaa Heshiiskanaga Wada Noolaansho?

Haa. Haddii labadiinaba aad go'aansataan in aad rabtaan inaad wax ka badashaan, waad kartaan. Labadiinaba waa inaad ogolaataan wax ka badalka aad rabtaan inaad samaysaan. Wax ka badaliddu waa in laga dhigo qoraal labadiinuna aad saxiixdaan. Haddii aad kaligaa doonaysid in la badalo qayb heshiiskiina ah inta kalana aad daynaysaan, waa inaad sidaa ku sheegtaa heshiiskiina cusub. Si cad u sheeg waxa aad badalaysid iyo qaybaha kale ee heshiiska wada noolaanshaha inuu sidiisii ahaan doono.

Maxaa ku dhacaya heshiiskanaga wada noolaansho haddii midkanagu dhinto?

Marka qof dhinto, hantida iyo lacagta ay ka tagaan waxaa la dhahaa “hantida qofka dhintay.” Marka qof guursaday dhinto dardaaran la’aan, badanaa hantida qofka dhintay waxaa qaadan xaaska/ninka hadhay. Tani kuma jiraan lamaanaha aan isqabin. In magacaaga aad rabitaankaaga u magacawday wehelkaaga mooyaane, ma heli doonaan hantida qofka dhintay marka aad dhimatid. Meeshii ay ka aadi lahayd hantidaadu xigtadaada ama dawladda haddii aadan xigto lahayn.

Wehelka aan is guursan luguma tiriyo ehel. Heshiiska wada noolaanshaha **waxaa is badala** waxa ku jira hantidaada ee qofka dhintay. Laakiin ogolaanshaha ehelkaaga oo kali ah ayaa siisa asaga ama ayada **xuquuq** waxyaabaha aad doonaysid inaad ka tagto.

Tusaale ahaan, waxaad dhigatay dhaqaalahaaga sannado badan akoonti bangi waxaa ku qoran magacaaga oo kali ah, marka aad dhimatid waxaa jira akoontigaaga $10,000. Haddii aadan haysan dardaaran oo uuna jirin heshiis wada noolaansho, dhamaan lacagtaas waxay noqon hantidaada qofka dhintay qaraabadaadana way dhaxli doonaan xataa haddii aad la noolayd wehelkaaga 20 sano.

Laakiin, haddii heshiiskaaga wada noolaansho sheegayo adiga iyo wehelkaaga inaad si siman u wadaagtan dhaqaalahaaga hadaba asagu ama ayadu waxay xaq u leedahay badh wax kasta oo ku jira akoontigaaga marka uu xidhiidhkiinu dhamaado. Sidaa darteed wehelkaaga wuxuu xaq u leeyahay $5,000 oo lacagta akoontiga ah. $5,000 ee kale waxay ku darman hantidaada laga dhintay.

Haddii sidoo kale aad haysatid dardaaran lacagta uu wehelkaagu kaga tagay akoontiga bangiga, hadaba sidoo kale wehelkaagu wuxuu heli $5,000 ee hantidaada aad ka dhimatay.

Heshiiska Wada Noolaansho ka soo horjeeda Dardaaran

Heshiiska wada noolaansho wuxuu siin karaa adiga ama wehelkaaga xoogaa difaac ah haddii xidhiidhkiinu ku dhamaado dhimasho midkiin. Hase yeeshee, maadaama oo aad qoraysid heshiiska inaad fahansantahay in la meel marin karo kala xidhiidh furashada ama dhimashadaada, ma samayn doontid go’aamo isku mid ah dardaaranka. Heshiiska wada noolaansho wuxuu kala qaybiyaa waxaad haysataan adiga iyo wehelkaaga. Dardaaranku wuxuu ku siiyaa xoriyadda kaga tagidda wax kasta oo uu haysto wehelkaagu haddii aad dooratay. Dardaaranku sidoo kale waa qaabka ugu wanaagsan in wax la siiyo wehelkaaga ka dib marka aad dhimatid.

Isa siinta dardaarankiina ama heshiiska wada noolaansho gaar ahaan waa muhiim haddii aad ku wada nooshihiin guri kaasoo uu leeyahay midkiin ama adiga ama wehelkaaga mid uun lagu ganaaxay shaqo inuu koriyo caruurta ama uu daryeelo guriga. In uu wehelkaagu xoogaa xuquuq ah ku leeyahay guriga aad leedahay mooyaane, dardaaran ama heshiis wada noolaansho mid uun, wehelkaaga waxaa lagu meel marin karaa inuu tago ka dib dhimashadaada, xataa haddii ayadu ma asagu ku noolaa halkaas sanado badan.

Xog dheeri ah oo ku saabsan dardaaranka iyo haddii ay tahay fikir wanaagsan in la haysto mid, fiiri warqaddayada *S-2 Common Questions about Wills*.

Seen u meel marin karaa heshiiskanaga wada noolaansho?

Heshiiska wada noolaansho waxaa kali ah oo meel marin kara maxkamad ka dib marka xidhiidhkiinu dhamaado. Haddii adiga iyo wehelkaagu kala tagtaan oo wehelkaagu uuna rabin inuu ayido heshiiskaaga ama uu jiro guri ama hanti kale oo ma guurta ah taasoo ay tahay in la kala qaybiyo waxaad aadi doontaa maxkamadda si ay u meel mariso heshiiskaaga. Waxaad keeni doontaa cabasho u sheegaysa maxkamadda waxa ku saabsan heshiiskaaga iyo sida aad u doonaysid in loo meel mariyo. Haddii ay jirto alaabo badan ama lacag ku lug leh, waa fikir wanaagsan in caawin laga helo qareen.

Haddii xidhiidhkiinu ku dhamaado dhimasho wehelkaaga, waxaad u baahan doontaa inaad la xidhiidho dardaaran sheegaha ee hantidiisa uu ka dhintay ama ay ka dhimatay waxaadna tusi heshiiskaaga wada noolaansho. Haddii hantida qofka dhintay ee wehelkaaga ay ku dhamaato qoraal dardaaran, waxaad u baahan doontaa inaad tusto maxkamadda heshiiskiina. Waa fikir wanaagsan inaad caawin ka hesho qareen muddada geedi socodkan.

Maxaa dhacaya haddii aan caruur isu leenahay?

Haddii aad caruur ku lug leedihiin, la hadal qareen.

Korinta ma uu meel marin karo heshiiska wada noolaanshaha. Arrimaha ku aaddan korinta oo ama booqasho lagu amro maxkamadda qoyska.

Marka lamaanaha isqaba kala tagaan, garsooraha amra furniinka ama kala tagidda ayaa qaata go'aamada ku aaddan hantida iyo korinta caruurta. Marka aad ku kala tagtaan lamaane aan isqabin, waxaad gayn kartaa kiis kala qaybsan maxkamadda qoyska oo ku saabsan korinta caruurta.

Maxaa ku dhacaya heshiiskanaga haddii wehelkaygu iyo anigu is guursano?

Haddii adiga iyo wehelkaagu is guursataan, heshiiskiina wada noolaansho ma ilaalinayo waxyaabaha dhaqaale ee xidhiidhkiina. Meeshii uu, sharcigu dabakhayo dhamaan lamaanaha isqaba ayuu idinkana idin qaban doonaa. Heshiiskiina wada noolaansho waxaa wali loo adeegsan in lagu kala qaybiyo hantida adiga iyo wehelkaaga aad laheydeen ka hor guurka.

Warqadaha kale ee xogta waxaad ka heli kartaa gal www.lawhelpmn.org/LASMfactsheets

Xafiiska Legal Aid ee degaankaaga waxaad ka heli kartaa www.lawhelpmn.org/resource/legal-aid-offices

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto.
Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano.
Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2016 Mid-Minnesota Legal Aid. Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixi aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro.

In loo daabaco, ama loo istimaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.